205. U Xus Eebahaa Naftaada Khushuuc (Baryo) iyo Cabsi, iyo Qaylo la‘aan hadal, Aroor iyo Galabba, hana Noqon kuwa Halmaama (Xuska Eebe).

وَٱذْكُر رَّبَّكَ فِى نَفْسِكَ تَضَرُّعًا وَخِيفَةً
وَدُونَ ٱلْجَهْرِ مِنَ ٱلْقَوْلِ بِٱلْغُدُوِّ وَٱلْـَٔاصَالِ
وَلَا تَكُن مِّنَ ٱلْغَـٰفِلِينَ ٢٠٥

206. Kuwa Eebe agtiisa ah iskama Kibriyaan Cibaadadiisa wayna u Tasbiixsadaan (Nasahaan) Isagayna u Sujuudaan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ عِندَ رَبِّكَ لَا يَسْتَكْبِرُونَ عَنْ عِبَادَتِهِۦ
وَيُسَبِّحُونَهُۥ وَلَهُۥ يَسْجُدُونَ ۩ ٢٠٦

Gaaladu waxay warsadeen Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Inuu la yimaaddo Mucjisooyin Jeebkiisa ah, wuxuuse Raacaa wixii Eebe u waxyooday oo xaq ah, waxna lagu kala garto, Hanuun iyo Naxariisna u ah Ciddii Xaqa Rumayn, Xaquna waa u Cad yahay Ciddii raaci, oo markuu maqlo Quraankoo la Akhrin maqlo una Dhagraariciya, si loogu naxariisto. Waana in Eebe si Hoos iyo Khushuuca loo Xuso oon qaylo lahayn waqti kasta iyo Subax iyo Galabba, lana halmaamin. Malaa‘igta Eebe Ag joogtana Iskama wayneeyaan Cibaadadiisa, wayna nasahaan oo u Tasbiixsadaan wayna u Sujuudaan.
Saas darteed waa in Xaqa la Raaco, Quraankana la Akhriyo, Eebe loo Xuso Hoos Subax iyo Galabba, lana halmaamin, Illeen Malaa‘igtaa Caabudi, isna kibrinayn, una sujuudiye. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Dadow u Dhimriya Naftiinna Illeen uma yeedhaysaan mid Dhaga la’ ama Maqane, ILaahaad u yeedhaysaan waa Wax Maqle, Dhawe, idiinkana Dhaw Cunaha Gaadiidkiinna.
Waxayna ahayd mar Dadku kor u Qaadeen Ducada. Al-Acraaf (203-206).

# Suurat Al-Anfaal — سورة الأنفال

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَـٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxay ku warsan Dadku (Xukunka) Qaniimada, waxaad dhahdaa Qanimada waxaa iska leh Eebe iyo Rasuulka ee ka Dhawrsada Eebe Wanaajiyana Xaalka Dhexdiinna ah Eebana Adeeca iyo Rasuulkiisa haddaad kuwo Rumeeyey tihiin.

يَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلْأَنفَالِ ۖ قُلِ ٱلْأَنفَالُ لِلَّهِ وَٱلرَّسُولِ ۖ
فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَأَصْلِحُوا۟ ذَاتَ بَيْنِكُمْ ۖ وَأَطِيعُوا۟
ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥٓ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ١

2. Mu‘miniinta dhabta ah waa uun kuwa marka Eebe la Xuso ay Cabsato Quluubtoodu, marka lagu Akhriyo korkooda Aayaadka Eebana ay Iimaan u kordhiso, Eebahood uun tala saarta,

إِنَّمَا ٱلْمُؤْمِنُونَ ٱلَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ ٱللَّهُ وَجِلَتْ
قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ ءَايَـٰتُهُۥ زَادَتْهُمْ إِيمَـٰنًا
وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ٢

3. Ee ah kuwa ooga Salaadda waxaannu ku Arzaaqnayna wax ka Bixiya.

ٱلَّذِينَ يُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ وَمِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ
يُنفِقُونَ ﴿٣﴾

4. Kuwaasaana ah Mu‘miniinta Xaqa ah, waxayna Mudan Jannooyin Eebahood agtiisa ah, iyo Dambi Dhaaf iyo Rizqi Sharaf leh.

أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُؤْمِنُونَ حَقًّا لَّهُمْ دَرَجَٰتٌ عِندَ
رَبِّهِمْ وَمَغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٤﴾

Dagaalkii waynaa ee Badar ee Dhexmaray Muslimiinta iyo Gaaladii yey ku soo Degtay Aayaddu, markay qaar Muslimiintii ka mida ku Hadleen Qaniimadii, waxaana Tawallin Eebe oo loo Iili Xaqa iyo Rasuulka (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) oo ku Bixin una qaybin Xaqa, Mase habboona in lagu Murmo, waase in Muslimiintu Eebe ka Dhawrsadaan, hagaajiyaanna Xaalka Dhexdooda ah, oyna Adeecaan Eebe iyo Rasuulkiisa hadday Mu‘miniin dhaba yhiin.
Aayadaha kale waxay Tilmaami Mu‘miniinta Dhabta ah, Wanaagga kuwa kulansaday, Marka Eebe la Xuso qalbigoodaa Argagaxa oo Cabsada, Marka Quraanka lagu Akhriyana Iimaan u kordho, Eebe uun tala saarta, Salaadda Ooga, Waxna Bixiya, Kuwaasaana ah Mu‘miniinta xaqa ah ee Dhabta ah, Mudanna Darajooyin Eebe Agtiisa, Dambi Dhaaf iyo Rizqi Sharaf leh. Al-Anfaal (1-4).

---

5. Siduu Kaaga Bixiyey Eebahaa Gurigaaga si Xaq ah (Jahaad) Koox Mu‘miniinta ka mida way Nacayeen.

كَمَآ أَخْرَجَكَ رَبُّكَ مِنۢ بَيْتِكَ بِٱلْحَقِّ وَإِنَّ فَرِيقًا
مِّنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ لَكَٰرِهُونَ ﴿٥﴾

6. Waxayna kugula Murmi Xaqa intuu u Cadaaday sidii iyagoo loo wado Geeri iyagoo Eegi.

يُجَٰدِلُونَكَ فِى ٱلْحَقِّ بَعْدَمَا تَبَيَّنَ كَأَنَّمَا يُسَاقُونَ
إِلَى ٱلْمَوْتِ وَهُمْ يَنظُرُونَ ﴿٦﴾

7. Xusuuso markuu idiin Yaboohay Eebe Labadii Kooxood midkood (Colkii iyo Safarkii) idiin Sugnaatay idinkoo Jecel in Midda Tabarta Yar idiin ahaato, Eebana wuxuu dooni inuu Xaqa ku sugo Kalimadiisa, Gooyana Cidhibta Gaalada.

وَإِذْ يَعِدُكُمُ ٱللَّهُ إِحْدَى ٱلطَّآئِفَتَيْنِ أَنَّهَا لَكُمْ
وَتَوَدُّونَ أَنَّ غَيْرَ ذَاتِ ٱلشَّوْكَةِ تَكُونُ
لَكُمْ وَيُرِيدُ ٱللَّهُ أَن يُحِقَّ ٱلْحَقَّ بِكَلِمَٰتِهِۦ
وَيَقْطَعَ دَابِرَ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٧﴾

8. Si uu Xaqa u sugo, una Buriyo Baadhilka (Xumaanta) haba Naceen Dambiilayaashuye.

لِيُحِقَّ ٱلْحَقَّ وَيُبْطِلَ ٱلْبَٰطِلَ وَلَوْ كَرِهَ
ٱلْمُجْرِمُونَ ﴿٨﴾

Aayadahanna waxay ka Warrami Dagaalkii Waynaa ee Badar iyo in Dad ka mida Muslimiintii ay Nacayeen in loo Baxo Dagaalka, Eebese wuxuu u Yaboohay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Labada Kooxood middood oo ah Safarkuu Abuusufyaan Hogaaminayey ee Shaam ka yimid iyo Colkii waynaa ee Gaaladii Makaad, Inkastooy Mu‘miniintu Jeclayd inay la Kulmaan Safarka, Eebaha Xigmadda lehse wuxuu Doonay inuu Xaqa Sugo, Xumaanta iyo Baadhilkana Buriyo oo Jabiyo, Gaaladana Gumaado, Saasaana Dhacday Maalintaas oo Gaaladii Kibirsanayd ee Badnaa waxaa Jabiyey Mu‘miniin yar, Gargaarka Eebana waa Mudantahay Ciddii Xaqa si Dhaba u Raacda ee Diinta Eebe ku Toosta. Al-Anfaal (5-8).

9. Xusuusta markaad ka Gargaar warsanayseen Eebe oo uu idinku Ajiibay waxaan idinku Xoojin Kun Malaa‘igta ka mida oo Israacraacsan.

إِذْ تَسْتَغِيثُونَ رَبَّكُمْ فَاسْتَجَابَ لَكُمْ أَنِّي
مُمِدُّكُم بِأَلْفٍ مِّنَ الْمَلَائِكَةِ مُرْدِفِينَ ﴿٩﴾

10. Wuxuu Eebe u Yeelay Bishaaro iyo inuu Xasilo Qalbigiinnu, Gargaarra waxaan Eebe Agtiisa ahayn ma aha, Eebana waa Adkaade Fal San.

وَمَا جَعَلَهُ اللَّهُ إِلَّا بُشْرَىٰ وَلِتَطْمَئِنَّ بِهِ قُلُوبُكُمْ
وَمَا النَّصْرُ إِلَّا مِنْ عِندِ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ
عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿١٠﴾

11. Xusuustana markuu idinku Daboolay Hurdo aaminnimo Darteed idinkagana soo Dejiyey Samada Biyo inuu idinku Daahiriyo idinkagana Tegsiiyo Waswaaska Shaydaanka iyo inuu ku Adkeeyo Quluubtiinna kuna Sugo Gommadihiinna.

إِذْ يُغَشِّيكُمُ النُّعَاسَ أَمَنَةً مِّنْهُ وَيُنَزِّلُ عَلَيْكُم
مِّنَ السَّمَاءِ مَاءً لِّيُطَهِّرَكُم بِهِ وَيُذْهِبَ عَنكُمْ
رِجْزَ الشَّيْطَانِ وَلِيَرْبِطَ عَلَىٰ قُلُوبِكُمْ
وَيُثَبِّتَ بِهِ الْأَقْدَامَ ﴿١١﴾

12. Markuu u waxyoon Eebahaa Malaa‘igta anaa idinla jira ee suga kuwa Xaqa Rumeeyey (Xoojiya) waxaan ku Tuuri Quluubta kuwa Gaaloobay Argagax ee ka Garaaca Luqunta korkeeda kana Garaaca Xubnaha faraha.

إِذْ يُوحِي رَبُّكَ إِلَى الْمَلَائِكَةِ أَنِّي مَعَكُمْ فَثَبِّتُوا
الَّذِينَ آمَنُوا سَأُلْقِي فِي قُلُوبِ الَّذِينَ كَفَرُوا
الرُّعْبَ فَاضْرِبُوا فَوْقَ الْأَعْنَاقِ وَاضْرِبُوا مِنْهُمْ
كُلَّ بَنَانٍ ﴿١٢﴾

13. Maxaayeelay waxay Khilaafeen Eebe iyo Rasuulkiisa, Ciddii Khilaafta Eebe iyo Rasuulkiisana Eebe waa u Ciqaab daranyahay.

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ شَاقُّوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَمَن يُشَاقِقِ
اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَإِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ ﴿١٣﴾

14. ee Arrintaas Dhadhamiya, Gaalana waxaa u Sugnaaday Cadaabka Naarta.

ذَٰلِكُمْ فَذُوقُوهُ وَأَنَّ لِلْكَافِرِينَ
عَذَابَ النَّارِ ﴿١٤﴾

Dagaalkii Badar wuxuu ahaa Arrin aad u wayn, Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) markuu dayey Asaxaabta oo SaddexBoqol iyo Dhawra iyo Gaaladii oo Kun ah yuu Qaabilay Qiblada Beryeyna Eebe isagoo Dhihi: Ilaahoow ii Fuli Yaboohaagii Ilaahoow haddaad halaagto Kooxdan Islaamka ah Lagugu Caabudi maayo Dhulka Waligeed, Intuu Go‘ii garbaha ka Dhaco oo Sayid Abuubakar ka Dhaho kugu Filan, wuxuuna Eebe ku xoojiyey Malaa‘ig si loogu Bishaareeyoo Mu‘miniinta, Quluubtoodana loo Xasiliyo, Gargaarna Eebaa haysta, waxaana qabatay Muslimiinta Hurdo inayan Cabsan, Roob Daahiriyana wuu u soo Daayey Niyada u Adkeeyey, Lugahana u sugay, wuxuuna Eebe faray Malaa‘igta inay Sugaan Mu’miinta Illeen Eebaa la jiree, kuna tuuri Niyadda Gaalada Argagax, iyo inay ka Garaacaan Madaxa iyo Faraha Illeen waxay Khilaafeen Eebe iyo Rasuulkiisii, Ciddii Khilaaftana waxay mudan Ciqaab Daran, Gaalana waxaa u sugnaaday Cadaabka Naarta, Saasuuna Eebe ugu Gargaaraa Mu‘miniinta Dhabta ah. Al-Anfaal (9-14).

---

15. Kuwa Xaqa Rumeeyow hadaad la Kulantaan Kuwa Gaaloobay idinkoo isusoo Dhawaan ha u jeedinina dabada (ha cararina).

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذَا لَقِيتُمُ الَّذِينَ كَفَرُوا
زَحْفًا فَلَا تُوَلُّوهُمُ الْأَدْبَارَ ﴿١٥﴾

16. Ruuxii u Jeediya Maalintaas Dabadiisa (Carara) isagoo u Xeelaysanayn Dagaal ama u Dumayn Koox wuxuu la Noqdaa Cadho Eebe Hooygiisuna waa Jahannamo iyadaana u Xun meel loo ahaado.

وَمَن يُوَلِّهِمْ يَوْمَئِذٍ دُبُرَهُۥٓ إِلَّا مُتَحَرِّفًا لِّقِتَالٍ
أَوْ مُتَحَيِّزًا إِلَىٰ فِئَةٍ فَقَدْ بَآءَ بِغَضَبٍ
مِّنَ ٱللَّهِ وَمَأْوَىٰهُ جَهَنَّمُ ۖ وَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ﴿١٦﴾

17. Idinku maydaan ku layn Gaalada (Xooggiinna) Eebaase laayey, mana Aadan Ganayn markaad ganaysay Eebaase Ganay (ku Hagaajiyey) inuu u Nicmeeyo Mu‘miniita Nicmo Wanaagsan, Eebana waa Maqle Og.

فَلَمْ تَقْتُلُوهُمْ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ قَتَلَهُمْ ۚ وَمَا رَمَيْتَ
إِذْ رَمَيْتَ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ رَمَىٰ ۚ
وَلِيُبْلِىَ ٱلْمُؤْمِنِينَ مِنْهُ بَلَآءً حَسَنًا ۚ
إِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿١٧﴾

18. Arrintaasna waxaa ugu wacan in Eebe uu Tabaryarayn Dhagarta Gaalada.

ذَٰلِكُمْ وَأَنَّ ٱللَّهَ مُوهِنُ كَيْدِ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿١٨﴾

Aayaduhu waxay Caddayn inay ka Reeboontahay Mu‘miinta markay Cadowgooda Gaalada ah Dagaal kula Kumlaan inay Cararaan oo Dhabarka u Jeediyaan, Ciddii Carartana waxay Mudan Cadho Eebe waxayna u Dheelman Naarta Jahannamo ee u xun meel loo ahaado,
Marka laga reebo u Xeelaysi Dagaal ama ku Biirid iyo Dumid Koox kale oo Taageerta. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu ka midyeelay ka Cararka Jahaadka Toddobada Dadka Halaagta Naartana Galisa. Wuxuuna Eebe ku Mannadaystay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Gargaarkii iyo Guushii waynayd ee Badar iyo in Eebe si Dhaba ugu hagaajiyey uguna Toosiyey Tuuryadii Gaalada intay ka Jabaan oo laga Laayo, Illeen awoodda Eebaa lehe, Mu‘miniintana wuxuu ugu Nicmeeyey Nicmo Wanaagsan, wuxuuna saas u falay inuu Jilciyo oo Tirtiro Dhagarta Gaalada, Colka Islaamka ah, Taasina waxay ku Tusin in Jahaadku Waajib adag yahay, Ciddii Muslima oo ka tagtana ay Mudan Dulli, Addoonsi iyo Tabar yari, Markiise Eebe lagu Xidhnaado, Diintana lagu Toosnaado Xaqana lagu Jahaado waxaa la heli Guul, Sharaf, Cisi, Dambi dhaaf iyo Jannadii Eebe ee Wanaagsanayd. Al-Anfaal (15-18).

19. Haddaad kala Xukumid Dalabteen Gaalooy waxaa idiin Yimid Gargaarkii (Nabiga) inaadse Reebtoontaan yaa idiin Khayr roon, haddaad ku noqotaan Xumaantana waxaannu ku Noqon Gargaarka (Nabiga) waxna idiinma tarayso Kooxdiinnu haba badnadeene Eebana wuxuu la Jiraa Mu‘miniinta.

إِن تَسْتَفْتِحُوا۟ فَقَدْ جَآءَكُمُ ٱلْفَتْحُ ۖ
وَإِن تَنتَهُوا۟ فَهُوَ خَيْرٌ لَّكُمْ ۖ وَإِن تَعُودُوا۟ نَعُدْ
وَلَن تُغْنِىَ عَنكُمْ فِئَتُكُمْ شَيْـًٔا وَلَوْ كَثُرَتْ
وَأَنَّ ٱللَّهَ مَعَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٩﴾

20. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow Adeeca Eebe iyo Rasuulkiisa hana ka Jeedsanina idinkoo Maqli.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ
وَلَا تَوَلَّوْا۟ عَنْهُ وَأَنتُمْ تَسْمَعُونَ ﴿٢٠﴾

21. Hana Noqonina kuwii Yidhi Maqallay iyagoon wax Maqlayn.

وَلَا تَكُونُوا۟ كَٱلَّذِينَ قَالُوا۟ سَمِعْنَا وَهُمْ
لَا يَسْمَعُونَ ﴿٢١﴾

22. Dhul Socod waxaa ugu Shar badan (Uxun) Eebe agtiisa ma Maqle (Xaqa) ma hadle oon kasayn (Wanaagga).

إِنَّ شَرَّ ٱلدَّوَآبِّ عِندَ ٱللَّهِ ٱلصُّمُّ ٱلْبُكْمُ
ٱلَّذِينَ لَا يَعْقِلُونَ ﴿٢٢﴾

23. hadduu ku Ogyahay Eebe Khayr wuu maqashiin lahaa (Garansiin lahaa) hadduuse Maqashiiyo way Jeedsanlahaayeen (Kibirdartiis) iyagoo is dadbi.

وَلَوْ عَلِمَ ٱللَّهُ فِيهِمْ خَيْرًا لَّأَسْمَعَهُمْ وَلَوْ أَسْمَعَهُمْ
لَتَوَلَّوا وَّهُم مُّعْرِضُونَ ﴿٢٣﴾

24. Kuwa Xaqa Rumeeyow Maqla Eebe iyo Rasuulka Markuu idiinku Yeedho wax idin nooleeya (XAQA) Ogaadana in Eebe (Karo) inuu kala Dhexmaro Ruuxa iyo Qalbigiisa, oo Xaggiisa laydiin soo Kulmin.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا ٱسْتَجِيبُوا لِلَّهِ وَلِلرَّسُولِ
إِذَا دَعَاكُمْ لِمَا يُحْيِيكُمْ وَٱعْلَمُوٓا أَنَّ ٱللَّهَ
يَحُولُ بَيْنَ ٱلْمَرْءِ وَقَلْبِهِۦ وَأَنَّهُۥٓ إِلَيْهِ
تُحْشَرُونَ ﴿٢٤﴾

Gaaladii Carbeed waxay Eebe warsan jiren isla wayni Darteed in Eebe Halaago Ciddii Xumaan wadda iyaga iyo Mu‘miniinta, waxaana u yimid waxay warsanayeen Maalintii Badar, waana la halaagay, inay Xumaanta ka joogaan yaana u Khayrroon, Hadday ku Noqdaanna Eebe wuxuu u Gargaari Mu‘miniinta Dhabta ah, waxaana laga rabaa Mu‘miniinta inay si run ah u Adeecaan Eebe iyo Rasuulkiisa, Xaqana raacaan, oyna la mid Noqon kuwa Dhaha waan maqalay iyagoon Maqlin, waxaana ugu Liita Eebe Agtiisa waxa Dhulka ku socda cid Xaqa ka Dhaga la‘, oo ka Afla‘, oon Garaynaynoo markii xaqa loo sheego ka Jeedsata, Dadka Mu‘miniinta ahse waa inay Maqlaan oo yeelaan Eebe iyo Rasuulkiisa Markuu wax nooleeya oo Diinta islaamka ah iyo xaqa ugu Yeedho, Illeen waa Nolole, waxa ka soo hadhayna waa Geeriye, Arrintana Eebaa haysta oo Toosin Cidduu doono oo Wanaagga ku Dadaasha, Xagiisaana laysu Kulmin. Saas darteed Ciddii Nolol, Wanaag, Sharaf iyo Khayr rabta ha Raacdo Quraanka iyo Xaqa. Al-Anfaal (19-24).

---

25. Ka Dhawrsada Fidmo oon ugu Dhacayn kuwii Dulmiga falay Gaar ahaan oo idinka mida, Ogaadana in Eebe Ciqaabtiisu Darantahay.

وَٱتَّقُوا فِتْنَةً لَّا تُصِيبَنَّ ٱلَّذِينَ ظَلَمُوا مِنكُمْ
خَآصَّةً وَٱعْلَمُوٓا أَنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿٢٥﴾

26. Xusuustana markaad ahaydeen kuwo yar oo lagu Tabar darraysto Dhulka (Makaad) idinkoo ka Cabsan in Dadku idin dafo oo markaas uu idin Dhaweeyey (Dumay) idinkuna Xoojiyey Gargaarkiisa, idinkuna Arzaaqay Wanaag (Xalaal) inaad ku Mahdisaan.

وَٱذْكُرُوٓا إِذْ أَنتُمْ قَلِيلٌ مُّسْتَضْعَفُونَ فِى ٱلْأَرْضِ
تَخَافُونَ أَن يَتَخَطَّفَكُمُ ٱلنَّاسُ فَـَٔاوَىٰكُمْ
وَأَيَّدَكُم بِنَصْرِهِۦ وَرَزَقَكُم مِّنَ ٱلطَّيِّبَٰتِ
لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٢٦﴾

27. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow ha Khayaamina Eebe iyo Rasuulka iyo Ammaanadiinna idinkoo Og.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا لَا تَخُونُوا ٱللَّهَ وَٱلرَّسُولَ
وَتَخُونُوٓا أَمَٰنَٰتِكُمْ وَأَنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٢٧﴾

28. Ogaadana in Xoolihiinnu iyo Caruurtiinnu Fidno uun yihiin oo Eebe Agtiisa Ajir wayn yahay.

وَٱعْلَمُوٓا أَنَّمَآ أَمْوَٰلُكُمْ وَأَوْلَٰدُكُمْ فِتْنَةٌ
وَأَنَّ ٱللَّهَ عِندَهُۥٓ أَجْرٌ عَظِيمٌ ﴿٢٨﴾

29. Kuwa (XAQA) Rumeeyow haddaad ka Dhawrsataan Eebe wuxuu idiin yeeli Faraj (iyo Nabadgalyo) wuxuuna Asturi Xumaantiinna «Dambigiinna», Wuuna idiin Dhaafi Eebana waa Fadli Wayne.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِن تَتَّقُوا۟ ٱللَّهَ يَجْعَل لَّكُمْ
فُرْقَانًا وَيُكَفِّرْ عَنكُمْ سَيِّـَٔاتِكُمْ وَيَغْفِرْ
لَكُمْ ۗ وَٱللَّهُ ذُو ٱلْفَضْلِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٢٩﴾

Xumaanta haddaan layska reebin kuma kaliyeysato Adduunka Ciddii Fashay kaliya, ee way wada heli Ciddii ku Dhaw oon Xumaanta Reebin Sida Xadiithyo Badan ku sugnaaday, waana arrin ay waajibtahay in si dhaba loo garto looguna camal falo. Tan kale waxay ahaayeen Muslimiintii Makaad kuwo tabar yar oo Cabsada Eebaase Xoojiyey oo Madiino Dejiyey una Gargaaray, oo Rizqi Fiican ku Arzaaqay, waana wax la Xusuusto oon la halmaami Karin tan kale waa inaan la Khayaamin Eebe, Diinta, Nabiga, Ammaanada iyo Xaqa isagoo la ogyahay, lana garto in Xoolaha iyo Caruurtu Fidmo iyo Imtixaan yihiin ee Wanaag iyo Ajir Eebe Agtiisa yaallo, Ciddii si Fiican u Dhawrsatana Eebe wuxuu u Furi Faraj, Wuuna Asturi, una Dambi Dhaafi Illeen Fadligiisaa Waasac ahe, isagaana Awoodda lehe. Al-Anfaal (25-29).

---

30. Xusuuso (Nabiyow) markay ku dhakrayeen Kuwii Gaaloobay inay ku Xidhaan, ama ku Dilaan ama ku Bixiyaan, way ku Dhakrayeen Eebaase ka abaal marin isagaana Abaal mariye Khayr roona ah.

وَإِذْ يَمْكُرُ بِكَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لِيُثْبِتُوكَ أَوْ يَقْتُلُوكَ
أَوْ يُخْرِجُوكَ ۚ وَيَمْكُرُونَ وَيَمْكُرُ ٱللَّهُ ۖ
وَٱللَّهُ خَيْرُ ٱلْمَٰكِرِينَ ﴿٣٠﴾

31. Marka lagu Akhriyo Aayaadkanaga waxay Dhahaan waan maqallay haddaan doonana waan Dhahaynaa kanoo kale (Quraanka) kanu waxaan warkii kuwii hore ahayn ma aha.

وَإِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتُنَا قَالُوا۟ قَدْ سَمِعْنَا
لَوْ نَشَآءُ لَقُلْنَا مِثْلَ هَٰذَآ ۙ إِنْ هَٰذَآ
إِلَّآ أَسَٰطِيرُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٣١﴾

32. Xusuuso markay Dheheen Eebow hadduu kanu Xaqa Agtaada ah yahay Nagaga soo daadi Dhagaxyo (Naara) Samada, ama noo keen Cadaab daran.

وَإِذْ قَالُوا۟ ٱللَّهُمَّ إِن كَانَ هَٰذَا هُوَ ٱلْحَقَّ
مِنْ عِندِكَ فَأَمْطِرْ عَلَيْنَا حِجَارَةً مِّنَ ٱلسَّمَآءِ
أَوِ ٱئْتِنَا بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٣٢﴾

33. Eebase ma aha kii Cadaaba Adoo Dhexjooga, mana aha mid Cadaaba iyagoo Dambi dhaaf warsan.

وَمَا كَانَ ٱللَّهُ لِيُعَذِّبَهُمْ وَأَنتَ فِيهِمْ ۚ
وَمَا كَانَ ٱللَّهُ مُعَذِّبَهُمْ وَهُمْ يَسْتَغْفِرُونَ ﴿٣٣﴾

Gaaladii Qureesheed Dhagarbay u sameeyeen Nabigii (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Waxayna ku Shireen Daaru Nadwa markay wax badan hadleenna waxaa Arrin soo Jeediyey Abuu Jahal wuxuuna soo Jeediyey in Meel kasta Wiil Xoog leh laga keeno markaas Seefo loo Dhiibo Nabigana hal mar kuwada Dhuftaan si qaraabadiisu Mag u qaadato Illeen lama Colloobi karaan Dadkoo dhane, waxayna isku waafaqeen Ra‘yigaas, Eebaase Ogaysiiyey Nabigiisa Arrintiina Gacantooda ka Bixiyey oo Nabadgaliyey Nabigii, waana kii baxay ee Godka galay isaga iyo Sayid Abuu Bakar, ka dibna Madiina aadeen. Waxayna ahaayeen Gaaladaasu kuwa marka lagu Akhriyo Quraanka Yidhaahda Maqallay, haddaan doonno waan dhihi lahayn isagoo kale, waana warkii dadkii hore, waxayna Codsadeen in Eebe Cadaab Cirka kaga soo daayo Hadduu Quraanku Xaq yahay, Taasina waa Duqonnimo wax Eebe la waydiistana ma aha, ee waxaa Habboon in la Dhaho Eebow nagu hanuuni Xaqa, Eebase ma Cadaabo Nabigoo Dhex Jooga ama iyagoo Dambi Dhaaf warsan, Illeen way dhawaafi jireene.
Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Waxaa Jiray Labo Ammaan, Nabigii iyo Dambi Dhaaf warsasho, waxaase tegey Nabigii waxaana hadhay Dambi dhaaf Doonidii. Al-Anfaal (30-33).

34. Muxuusanse Eebe u Cadaabayn iyagoo ka Celin Dadka Masjidka Xurmada leh, mana aha Ehelkiisa, Ehelkiisu waxaan kuwa dhawrsada ahayn ma aha, Badan koodse ma Oga.

وَمَا لَهُمْ أَلَّا يُعَذِّبَهُمُ ٱللَّهُ وَهُمْ يَصُدُّونَ
عَنِ ٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ وَمَا كَانُوٓا۟ أَوْلِيَآءَهُۥٓ ۚ
إِنْ أَوْلِيَآؤُهُۥٓ إِلَّا ٱلْمُتَّقُونَ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٤﴾

35. Salaaddooda Kacbada agteeda ahna ma aha waxaan Foodhi iyo Sacabbo Tumid ahayn, ee Dhadhamiya Cadaabka Gaalnimadiinna Darteed.

وَمَا كَانَ صَلَاتُهُمْ عِندَ ٱلْبَيْتِ إِلَّا مُكَآءً
وَتَصْدِيَةً ۚ فَذُوقُوا۟ ٱلْعَذَابَ بِمَا كُنتُمْ
تَكْفُرُونَ ﴿٣٥﴾

36. Kuwii Gaaloobay waxay ku Bixin Xoolahooda inay ka Celiyaan Dadka Jidka Eebe way Bixin doonaan waxayna ku noqon Qoomamo markaasaa laga Adkaan, kuwa Gaaloobayna Xaga Jahannamaa Loo kulmin.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ يُنفِقُونَ أَمْوَٰلَهُمْ لِيَصُدُّوا۟
عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ فَسَيُنفِقُونَهَا ثُمَّ تَكُونُ عَلَيْهِمْ
حَسْرَةً ثُمَّ يُغْلَبُونَ ۗ وَٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ إِلَىٰ جَهَنَّمَ
يُحْشَرُونَ ﴿٣٦﴾

37. in Eebe kala Bixiyo Xumaanta iyo Wanaagga, Yeelana Xumaanta Qaarkeed tan Kale Korkeeda uuna Kulmin Dhammaan uuna Yeeli Jahannamo kuwaasuna waa uun kuwa Khasaaray.

لِيَمِيزَ ٱللَّهُ ٱلْخَبِيثَ مِنَ ٱلطَّيِّبِ وَيَجْعَلَ ٱلْخَبِيثَ
بَعْضَهُۥ عَلَىٰ بَعْضٍ فَيَرْكُمَهُۥ جَمِيعًا فَيَجْعَلَهُۥ
فِى جَهَنَّمَ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ﴿٣٧﴾

Gaaladu way Mutaan Ciqaabta iyo Cadaabkaba, Illeen waxay dadka ka Celiyaan Masaajidka Xurmaysan, oo ayna Mudnayn inay Daris la Noqdaan waxaase Mudan inuu Gacanta ku hayo Muslimiinta. Gaaladuna Dhab ahaan ugama yaabaan Eebe, Cibaadadooduse waa Foodhi, Buuq iyo Sacabbo Tun, Abaalkooduna waa Cadaab Gaalnimadooda Dartiis, waxay Gaaladu Bixin oo Xoola ah inay Jidka Eebe ka Leexiyaan, way Bixin waxayse ku Noqon Khasaare waana laga Adkaan, Naarta Jahannamana waa lagu Kulmin, si Eebe u kala saaro Xumaanta iyo Wanaagga, Xumaanta wuu Kulmiyaa Dhammaanna yeela Naarta Jahannamo waana kuwa Khasaaray.
Ibnu Isxaaq wuxuu sheegay in Cabdullaahi Binu Rabiica, Cigrama AbuuJahal iyo Safwaan Binu Umaya u Tageen Abii Sufyaan Dagaalkii Badar ee lagu Laayey Qaraabadoodii inay Ogolaadaan Safarkii Abuu Sufyaan Hoggaaminayey ee Dagaalku ku Billowday Xoolihiisa in lagu Bixiyo la Dagaallanka Nabiga iyo Muslimiinta, markaasaa waxaa soo Degtay Aayadahan.
Badarbay ku soo Degeenna waa la Yidhi, waxaase Dhaba in Gaalo Khasaari. Al-Anfaal (34-37).

---

38. Ku Dheh kuwii Gaaloobay hadday ka Reebtoomaan (Gaalnimada) waxaa loo Dhaafi wixii hor maray, haddayse Daa‘imaan (Gaalnimada) waxaa tagtay «horraysay» jidkii kuwii hore.

قُل لِّلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ إِن يَنتَهُوا۟ يُغْفَرْ لَهُم
مَّا قَدْ سَلَفَ وَإِن يَعُودُوا۟ فَقَدْ مَضَتْ سُنَّتُ
ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٣٨﴾

39. la Dagaallama Gaalada intaan Gaalnimo iyo «Xumaan» laga helin

وَقَٰتِلُوهُمْ حَتَّىٰ لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ

una ahaato Diintu Dhammaan Eebe, hadday Reebtoomaan Eebe waxay Fali wuu Arkayaa.

الدِّينُ كُلُّهُۥ لِلَّهِ فَإِنِ انتَهَوْا فَإِنَّ اللَّهَ
بِمَا يَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٣٩﴾

40. Hadday Jeedsadaanna ogaada in Eebe yahay Gargaarihiinna isagaana u Fiican Gargaare.

وَإِن تَوَلَّوْا فَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ مَوْلَىٰكُمْ نِعْمَ الْمَوْلَىٰ
وَنِعْمَ النَّصِيرُ ﴿٤٠﴾

41. Ogaadana waxaad Qanimaysataan in Eebe Shan Meelood Meel Leeyahay, iyo Rasuulku, iyo Qaraabada, iyo Agoonta, iyo Masaakiinta, iyo Socdaalka, haddaad tihiin kuwo Rumeeyey Eebe iyo waxaan ku Dejinnay Addoonkanaga Maalintii kala Bixinta, Maalintay kulmeen Labadii Col (Badar) Eebana wax kasta (oo uu Doono) wuu karaa.

۞ وَاعْلَمُوا أَنَّمَا غَنِمْتُم مِّن شَيْءٍ فَأَنَّ لِلَّهِ خُمُسَهُۥ
وَلِلرَّسُولِ وَلِذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَٰمَىٰ وَالْمَسَٰكِينِ
وَابْنِ السَّبِيلِ إِن كُنتُمْ ءَامَنتُم بِاللَّهِ وَمَا أَنزَلْنَا
عَلَىٰ عَبْدِنَا يَوْمَ الْفُرْقَانِ يَوْمَ الْتَقَى الْجَمْعَانِ
وَاللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٤١﴾

Eebe waa Naxariiste wuxuuna u Dhaafaa wixii hore Ciddii Gaalnimada ka soo Noqota oo Xumaanta ka Toobadkeenta, sida ku Sugnaatay Xadiith: Islaamku wuu Tiraa wixii ka horreeyey, Toobadduna way Tirtaa wixii ka horreeyey, Ciddii Xumaan ku Noqota way Caddahay Waddadii kuwii hore. Waana in Gaalada lala Dagaallamo intaan Xumaan laga helin‘Diintuna Dhammaan Eebe u ahaato, ciddii Xumaanta ka Joogtana Eebe wuu arkaa, Ciddii Jeedsatana Eebaa uga gargaari Mu‘miniinta, Kaalmeeye iyo Gargaarana Eebaa u Fiican. Wixii Gaalada laga helo waqtiga Dagaalkana Shan Meelood Meel waxaa loo iili Jidka Eebe iyo Rasuulkiisa, qaraabada Nabiga oo Sako la siinayn, Agoonta, Masaakiinta, iyo Socdaalka, haddii Dhab loo Rumeeyey Eebe iyo Quraanka, waana Xoolo Xalaala oo lagu Xoojin Islaamka iyo Xaqa, laguna Wiiqi Gaalada. Al-Anfaal (38-41).

---

42. Xusuusta markaad ahaydeen Dhinicii u Dhawaa (Badar) Gaaladuna ahayd Dhinicii ka Fogaa (Badar) Safarkiina idinka Hooseeyey hadaad isu yaboohdaan (Ballanna) waad isku Khilaafi lahaydeen Ballanka, Eebaase Falay inuu Xukumo Amar uu Fali in Ciddii Halaagsamina si Cad u Halaagsanto, Ciddii Noolaanna si Cad u Noolaato, Eebana waa Maqle Og.

إِذْ أَنتُم بِالْعُدْوَةِ الدُّنْيَا وَهُم بِالْعُدْوَةِ الْقُصْوَىٰ
وَالرَّكْبُ أَسْفَلَ مِنكُمْ وَلَوْ تَوَاعَدتُّمْ
لَاخْتَلَفْتُمْ فِي الْمِيعَٰدِ وَلَٰكِن لِّيَقْضِيَ اللَّهُ
أَمْرًا كَانَ مَفْعُولًا لِّيَهْلِكَ مَنْ هَلَكَ
عَنۢ بَيِّنَةٍ وَيَحْيَىٰ مَنْ حَيَّ عَنۢ بَيِّنَةٍ وَإِنَّ اللَّهَ
لَسَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٤٢﴾

43. Markuu idinku Tusiyey Eebe Gaalada Hurdada iyagoo yar, haddu ku Tusiyo Iyagoo Badanna waad Fashili lahaydeen ood ku Murmi lahaydeen Amarka, Eebaase Nabadgaliyey, Illeen wuu Ogyahay waxa Laabta ku Sugane.

إِذْ يُرِيكَهُمُ اللَّهُ فِي مَنَامِكَ قَلِيلًا
وَلَوْ أَرَىٰكَهُمْ كَثِيرًا لَّفَشِلْتُمْ وَلَتَنَٰزَعْتُمْ
فِي الْأَمْرِ وَلَٰكِنَّ اللَّهَ سَلَّمَ إِنَّهُۥ عَلِيمٌۢ
بِذَاتِ الصُّدُورِ ﴿٤٣﴾

44. Iyo markuu idin Tusiyey markaad Kulanteen iyagoo ku Yar indhihiinna, idinkuna yareeyey Indhahooda in Eebe Xukumo Amar uu Fali, Xagga Eebaana loo Celin Umuuraha.

وَإِذْ يُرِيكُمُوهُمْ إِذِ ٱلْتَقَيْتُمْ فِىٓ أَعْيُنِكُمْ قَلِيلًا
وَيُقَلِّلُكُمْ فِىٓ أَعْيُنِهِمْ لِيَقْضِىَ ٱللَّهُ أَمْرًا
كَانَ مَفْعُولًا ۗ وَإِلَى ٱللَّهِ تُرْجَعُ ٱلْأُمُورُ ﴿٤٤﴾

Muslimiintu waxay Degeen Daanta Badar ee Xigta Xagga Madiino, Gaaladuna Xagga Maka Jahadeeda, Safarkiina Maray Xagga Badda Eebana Kulmiyey si Ciddii Halaagsami iyo tan Noolaanba Xaalku u Caddaado, Wuxuuna Eebe isu Muujiyey Labada Kooxood iyadoo midba la yartahay midda kale, in Eebe sugo Guusha Islaamka, Saasayna u Kulmeen Labadaas Col, oo midna Xaqa iyo Islaamka Matalayo iyo mid Gaalnimo iyo Isla wayni, Wuxuuna Ibnu Jariir Sheegay in Abuu Sufyaan u Ciddiray Gaaladii Qureesheed kuna yidhi: Noqda waa nabadgalaye,waxaase Diiday Abuu Jahal oo sheegay inayna Noqonayn intay ka Tagaan Ceelka Badar, Saddex Maalmoodna ku Nagaadaan oo Cunno ku Cunaan, Geelna ku qashaan, Khamrana ku Cabbaan Gabdhuhuna Durbaan u Garaacaan oo Carabtuna Maqasho, Qaddariyaanna, Nabiguna wuxuu Yidhi: Maka waxay idinku soo Tuurtay Beerkeedii, waana kaas Xaq iyo Xumaan. Al-Anfaal (42-44).

---

45. Kuwa Xaqa Rumeeyow haddaad la Kulantaan Koox (Cadow ah) Sugnaada Xusana Eebe wax Badan inaad Liibaantaan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِذَا لَقِيتُمْ فِئَةً فَٱثْبُتُوا۟
وَٱذْكُرُوا۟ ٱللَّهَ كَثِيرًا لَّعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٤٥﴾

46. Adeecana Eebe iyo Rasuulkiisa hana Murmina ood Fashishaan uu tagana Xooggiinnu Samra Eebe wuxuu la jiraa kuwa Samree (Adkaysta).

وَأَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَلَا تَنَٰزَعُوا۟ فَتَفْشَلُوا۟
وَتَذْهَبَ رِيحُكُمْ ۖ وَٱصْبِرُوٓا۟ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ
مَعَ ٱلصَّٰبِرِينَ ﴿٤٦﴾

47. Hana ka mid Noqonina kuwii ka baxay Guryahooda Kibir iyo istuska Dadka Darttiis kana Celinaya (Dadka) Jidka Eebe,Eebana waa Koobay waxay Camal Fali.

وَلَا تَكُونُوا۟ كَٱلَّذِينَ خَرَجُوا۟ مِن دِيَٰرِهِم بَطَرًا
وَرِئَآءَ ٱلنَّاسِ وَيَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ
وَٱللَّهُ بِمَا يَعْمَلُونَ مُحِيطٌ ﴿٤٧﴾

48. Markuu u Qurxiyey Shaydaanku Camalkooda kuna Yidhi wax idinka Adkaan oo Dada ma jiro Maanta, anna kaalmeeyaan idiin ahay, markay isarkeen Labadii Kooxoodna wuxuu u gurtay Cidhibtiisa, wuxuuna yidhi anugu Bari baan idinka ahay, waxaana arkaa waxaydaan Arkin waxaana ka Cabsan Eebe Ilaahayna waa Ciqaab darane.

وَإِذْ زَيَّنَ لَهُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ أَعْمَٰلَهُمْ وَقَالَ لَا غَالِبَ
لَكُمُ ٱلْيَوْمَ مِنَ ٱلنَّاسِ وَإِنِّى جَارٌ
لَّكُمْ ۖ فَلَمَّا تَرَآءَتِ ٱلْفِئَتَانِ نَكَصَ عَلَىٰ عَقِبَيْهِ
وَقَالَ إِنِّى بَرِىٓءٌ مِّنكُمْ إِنِّىٓ أَرَىٰ مَا لَا تَرَوْنَ
إِنِّىٓ أَخَافُ ٱللَّهَ ۚ وَٱللَّهُ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿٤٨﴾

49. Markay dhahayeen Munaafiqiintu iyo kuwa Cudurku Qalbiga kaga

إِذْ يَقُولُ ٱلْمُنَٰفِقُونَ وَٱلَّذِينَ فِى قُلُوبِهِم

jiro, waxaa Dhagray Kuwaas Diintooda, Ciddii Eebe tala saarata Ilaahay waa Adkaade Falsan.

مَرَضٌ غَرَّ هَٰٓؤُلَآءِ دِينُهُمْۗ وَمَن يَتَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِ
فَإِنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ٤٩

Waa in la sugnaado marka Colka lala Kulmo oon la Cararin, Eebana la Xuso, lana Adeeco Eebe iyo Rasuulkiisa, lana Murmin si aan loo fashilin loona Tabar yaraan, waana in la adkaysto Illeen Eebe wuxuu la Jiraa Cidda Adkaysatee, lana Mid noqonin sidii Gaaladii reer makaad ee Kibirka iyo is Tustuska Dadka iyo Xaqa ka Leexintiisa u soo Baxday, Shaydaanna u Qurxiyey Camalkooda una Sheegay inaan laga Adkaanayn una Gargaari, Markay labadii Col Kulmeenna Dib u Gurtay, Sheegayna inuu Arko waxayna Arag, Sheegayna inuu Eebe Ka yaabi isagoo Been sheegi, Munaafiqiinta iyo Kuwa Qalbiga ka Bukana ku Sheegi Mu‘miniinta in Diintoodu Khaladay Beenna u Sheegtay, Ciddiise Eebe tala Saarata Isagaa Adkaada ah Falsan, waxaana muuqda in la adkaysto Eebana lagu Xidhnaado, Kibir, Istus, iyo Shaydaanna laga Fogaado. Al-Anfaal (45-49).

---

50. Haddaad Aragto Markay Oofsan (Nafta ka qaadi) Malaa‘igtu kuwii Gaaloobay oy ka Garaaci Wajiyadooda iyo Gadaashooda iyagoo ku Dhihi Dhadhamiya Cadaabka Gubidda (waxaad arki lahayd Arrin wayn).

وَلَوْ تَرَىٰٓ إِذْ يَتَوَفَّى ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ۙ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ
يَضْرِبُونَ وُجُوهَهُمْ وَأَدْبَٰرَهُمْ
وَذُوقُوا۟ عَذَابَ ٱلْحَرِيقِ ٥٠

51. Arrintaasuna waa waxay hormarsatay Gacmihiinnu darteed Eebana ma Dulmiyo Addoomada.

ذَٰلِكَ بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيكُمْ وَأَنَّ ٱللَّهَ لَيْسَ
بِظَلَّٰمٍ لِّلْعَبِيدِ ٥١

52. Waa Caadadii Fircoon Qomkiisii iyo kuwii ka horreeyey ee ka Gaaloobay Aayaadkii Eebe oo Eebe Qabtay Dambigooda Dartiis, Eebana waa Xoog badane Ciqaab daran.

كَدَأْبِ ءَالِ فِرْعَوْنَ ۙ وَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ كَفَرُوا۟
بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ فَأَخَذَهُمُ ٱللَّهُ بِذُنُوبِهِمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ
قَوِىٌّ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ٥٢

53. Arrintaasna waa inaan Eebe doorinin Nicmo uu ugu Nicmeeyey Qoom intay ka Dooriyaan waxa Naftooda ah, Eebana waa Maqle Og.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ لَمْ يَكُ مُغَيِّرًا نِّعْمَةً أَنْعَمَهَا عَلَىٰ قَوْمٍ
حَتَّىٰ يُغَيِّرُوا۟ مَا بِأَنفُسِهِمْ ۙ وَأَنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ٥٣

54. Waa Caadadii Fircoon Qoomkiisii iyo kuwii ka Horreeyey, waxay ka Gaaloobeen Aayaadkii Eebahood markaasuu Halaagay Dambigooda Dartiis waxayna Dhammaan ahaayeen Daalimiin.

كَدَأْبِ ءَالِ فِرْعَوْنَ ۙ وَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ
كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِ رَبِّهِمْ فَأَهْلَكْنَٰهُم بِذُنُوبِهِمْ
وَأَغْرَقْنَآ ءَالَ فِرْعَوْنَ ۚ وَكُلٌّ كَانُوا۟ ظَٰلِمِينَ ٥٤

Geeridu waa wax wayn, Saas darteed yuu Eebe u sheegay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalo Eebe korkiisa ha yeelee) in hadduu arko Gaalada oo Malaa‘igtu Nafta ka Qaadi kana Garaaci Wajiga iyo Gadaasha kuna Dhihi Dhadhamiya Cadaabka Gubidda inuu Arki lahaa Arrin wayn, waana hormarsadeen Gacmahoodu Illeen Eebe ma Dulmiyo Addoomadee, waxayna la midyihiin Fircoon iyo Dadkiisii iyo kuwii ka horreeyey ee ka Gaaloobay Aayaadka Eebe oo Eebe qabtay Dambigoodii dartiis, Eebana Waa Xoog badane Ciqaabtiisuna darantahay, waxaana ugu wacan inaan Eebe Dad ka Doorinin Nicmo uu ugu Nicmeeyey intay Naftooda ka Dooriyaan, Dambina falaan, Illeen Eebe waa Maqle Oge, Sidaasna waxaa falay Fircoon iyo Dadkiisii iyo kuwii ka horreeyey oo Beeniyey Aayadkii Eebe markaasna Eebe Halaagay Dambigooda Dartiis, Fircoon iyo Colkiisiina wuu Maansheeyey illeen Daalimiinbay ahaayeene. Al-Anfaal (50-54).

55. Dhul Socde waxaa ugu Shar badan Eebe Agtiisa kuwa Gaaloobay oon Rumeynin.

إِنَّ شَرَّ ٱلدَّوَآبِّ عِندَ ٱللَّهِ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ فَهُمۡ
لَا يُؤۡمِنُونَ ٥٥

56. ee ah Kuwaad la Ballantay markaas Buriya Ballankooda mar kasta, oon Dhawrsanayn.

ٱلَّذِينَ عَٰهَدتَّ مِنۡهُمۡ ثُمَّ يَنقُضُونَ عَهۡدَهُمۡ
فِي كُلِّ مَرَّةٖ وَهُمۡ لَا يَتَّقُونَ ٥٦

57. Haddaad ku Liibaanto (Adkaato) Dagaalka ku Eri (xanuuji) kuwa ka Dambeeya inay Xusuustaan.

فَإِمَّا تَثۡقَفَنَّهُمۡ فِي ٱلۡحَرۡبِ فَشَرِّدۡ بِهِم مَّنۡ خَلۡفَهُمۡ
لَعَلَّهُمۡ يَذَّكَّرُونَ ٥٧

58. Haddaad ka Cabsato Qoom Khayaanadii u Tuur (Ogaysii) Ballankii si siman, Illeen Eebe ma Jecla Khaa‘imiinta.

وَإِمَّا تَخَافَنَّ مِن قَوۡمٍ خِيَانَةٗ فَٱنۢبِذۡ إِلَيۡهِمۡ
عَلَىٰ سَوَآءٍۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ ٱلۡخَآئِنِينَ ٥٨

59. Yeyna u malayn kuwii Gaaloobay inay Carari (Karaan) iyagu ma Daaliyaan (Eebe).

وَلَا يَحۡسَبَنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ سَبَقُوٓاْۚ إِنَّهُمۡ
لَا يُعۡجِزُونَ ٥٩

60. Ugu Darbada waxaad kartaan oo Xooga, iyo Darbidda Fardaha inaad ku Cabsi galisaan Colka Eebe iyo Colkiina (Gaalada) iyo kuwa kale oo ka soo hadhay (Munaafiqiinta) ma ogidin Eebaase Og, waxaad ku Bixisaan Jidka Eebana waa laydiin oofin (Dhammayn) idinkoon laydin Dulmiyeyn.

وَأَعِدُّواْ لَهُم مَّا ٱسۡتَطَعۡتُم مِّن قُوَّةٖ
وَمِن رِّبَاطِ ٱلۡخَيۡلِ تُرۡهِبُونَ بِهِۦ عَدُوَّ ٱللَّهِ
وَعَدُوَّكُمۡ وَءَاخَرِينَ مِن دُونِهِمۡ لَا تَعۡلَمُونَهُمُ
ٱللَّهُ يَعۡلَمُهُمۡۚ وَمَا تُنفِقُواْ مِن شَيۡءٖ فِي سَبِيلِ
ٱللَّهِ يُوَفَّ إِلَيۡكُمۡ وَأَنتُمۡ لَا تُظۡلَمُونَ ٦٠

Aayadahanna wuxuu Eebe ku sheegay in waxa Dhulka ku socda ugu Liito Gaalada Beenisay Xaqa, een waliba Rumaynayn, oo Buriya Ballanka Nabiga markasta oon Dhawrsanaynna, Eebaana Faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalo Eebe korkiisa ha yeelee) in Cidduu ka helo kuwaas Dagaalka uu Xanuunjiyo si kuwa ka Dambeeya u Cabsadaan, una Xusuustaan, Hadduu Khayaamadooda ka Yaabana uu ogaysiiyo inuu Ballankoodii u Celiyey Aaminaynna mar kale, Illeen Eebe ma Jecla Khaa‘imiintee, Yeyna u malayn Gaaladu inay Eebe ka Carari Karaan Wuxuuna Eebe faray Muslimiinta inay u Darbadaan Dagaalka Gaalada una hub samaystaan, iyagoo ku Cabsi galin Colka Eebe iyo Muslimiinta Gaalada ah, kuwa la ogyahay iyo kuwa Eebe uun Ogyahay, Jidka Eebana wax lagu Bixiyo, si Eebe ugu oofiyo Wanaagga oon loona Dulmiyin. Waxaana ku soo Arooray Wanaagga Dagaal Barashada iyo Hubka Xadiithyo badan sida: Fardaha Fuuliddooda waxaa lagu Xidhay Khayr tan iyo Qiyaamada, iyo Gana oo kora Ganiddaana ka Khayr roon Koridda. Taasina waxay muujin inay Waajibtahay in loo Darbado Jahaadka iyo daaficidda Diinta, Xoolaha, Dhulka iyo Sharafta, markay ka tageen Muslimiintuna Amarkii Eebe yey Dulloobeen, Gaalana u Talisay, Jahaad umbaana ka Saarikara. Al-Anfaal (55-60).

---

61. Hadday u Iishaan Gaaladu Nabad u Iilo adna talana Saaro Eebe, Illeen isagaa uun Maqla ognee.

۞ وَإِن جَنَحُواْ لِلسَّلۡمِ فَٱجۡنَحۡ لَهَا وَتَوَكَّلۡ عَلَى ٱللَّهِۚ
إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلۡعَلِيمُ ٦١

62. Hadday Doonaan inay ku Dhagraan waxaa Kaafiyahaaga ah Eebaha kugu Xoojiya Gargaarkiisa iyo Mu‘miniinta.

وَإِن يُرِيدُوٓاْ أَن يَخۡدَعُوكَ فَإِنَّ حَسۡبَكَ ٱللَّهُۚ
هُوَ ٱلَّذِيٓ أَيَّدَكَ بِنَصۡرِهِۦ وَبِٱلۡمُؤۡمِنِينَ ٦٢

63. Isuna soo Dumay Quluubtooda, haddaad Bixiso waxa Dhulka ku Sugan oo Dhan Maadan isu Dunteen Quluubtooda, Eebaase isu Dumay Dhexdooda Illeen isagaa Adkaade falsan ehe.

وَأَلَّفَ بَيۡنَ قُلُوبِهِمۡۚ لَوۡ أَنفَقۡتَ مَا فِي ٱلۡأَرۡضِ
جَمِيعٗا مَّآ أَلَّفۡتَ بَيۡنَ قُلُوبِهِمۡ وَلَٰكِنَّ
ٱللَّهَ أَلَّفَ بَيۡنَهُمۡۚ إِنَّهُۥ عَزِيزٌ حَكِيمٞ ٦٣

64. Nabiyow waxaa kugu Filan Eebe Adi iyo inta ku Raacday ee Mu‘miniinta ah.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ حَسۡبُكَ ٱللَّهُ وَمَنِ ٱتَّبَعَكَ
مِنَ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ٦٤

65. Nabiyow ku boorri mu‘miniinta Dagaalka hadday idinka Mid yihiin Labaatan Samra (Adkaysta) Waxay ka adkaan Labo Boqol, Hadday idinka Mid yihiin Boqol waxay ka Adkaan Kun ah kuwa Gaaloobay Illeen waa Qoomaan wax kasayne.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ حَرِّضِ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ عَلَى ٱلۡقِتَالِۚ
إِن يَكُن مِّنكُمۡ عِشۡرُونَ صَٰبِرُونَ يَغۡلِبُواْ مِاْئَتَيۡنِۚ
وَإِن يَكُن مِّنكُم مِّاْئَةٞ يَغۡلِبُوٓاْ أَلۡفٗا
مِّنَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بِأَنَّهُمۡ قَوۡمٞ لَّا يَفۡقَهُونَ ٦٥

Diinta Islaamku waa Diin Nabad galyo, Isjaceyl, Iskaalmayn, Saas darteed yuu Eebe faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha Yeelee) In hadday Gaaladu u Leexdaan oo Doonaan Nabad iyo Dagaalla‘aan Nabiguna u Leexdo Eebana Talo saarto kana Digtoonaado, Illeen Eebaa wax Maqla waxna Oge, hadday doonaan inay Khayaamaan oo DhagraanNabigana waxaa ku Filan Eebaha ku Xoojiyey Gargaarkiisa iyo Mu‘miniinta, Isuna Dumay Quluubta Mu‘miniinta, Illeen waxa Dhulka ku sugan oo Dhan haddii la Bixiyo cidina isuma Dumi karto Quluubtoode, Eebaase isu Dumay, Illeen isagaa Adkaada oo Falsame,Kaafiyana Nabiga iyo Mu‘miniintee,Tan kale waa in Mu‘miniintu Dagaallamaan Xaqana difaacaan haba ka badnaadeen Gaaladuyee, Illeen Muslimiinta waxaa laga rabaa Adkaysi, Rumayn Xaqa, iyo Jahaad Dhab ah, Gaalana way Jabi oo Halaagsami hadday la Dagaallamaan Muslimiintii Dhaba oo Geerida Ogol Eebana ku Xidhan Dhabna u Rumeysan. Al-Anfaal (61-65).

---

66. Hadda wuu idinka Fududeeyey Eebe wuxuuna ogyahay inaad tabar Yartihiin hadday idinka Mid yihiin Boqol Samra (Adkaysta) waxay ka Adkaan Labo Boqol, Hadday idinka Mid yihiin Kunna waxay ka Adkaan Labo Kun Idanka Eebe, ILaahayna wuxuu la Jiraa kuwa samra.

ٱلۡـَٰٔنَ خَفَّفَ ٱللَّهُ عَنكُمۡ وَعَلِمَ أَنَّ فِيكُمۡ ضَعۡفٗاۚ
فَإِن يَكُن مِّنكُم مِّاْئَةٞ صَابِرَةٞ يَغۡلِبُواْ مِاْئَتَيۡنِۚ
وَإِن يَكُن مِّنكُمۡ أَلۡفٞ يَغۡلِبُوٓاْ أَلۡفَيۡنِ بِإِذۡنِ ٱللَّهِۗ
وَٱللَّهُ مَعَ ٱلصَّٰبِرِينَ ٦٦

67. Kuma habboona Nabi inay u ahaato kuwo la qafaashay intuu kaga Jilciyo Dhulka Dhexdiisa (Gaalada) waxaad Doonaysaan Muuqa Addunyada Eebana wuxuu dooni Aakhiro Eebana waa Adkaade Falsan.

مَا كَانَ لِنَبِيٍّ أَن يَكُونَ لَهُۥٓ أَسۡرَىٰ حَتَّىٰ يُثۡخِنَ
فِي ٱلۡأَرۡضِۚ تُرِيدُونَ عَرَضَ ٱلدُّنۡيَا وَٱللَّهُ يُرِيدُ
ٱلۡأٓخِرَةَۗ وَٱللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٞ ٦٧

68. Hadduusan Jirin Kitaab Eebe oo horreeyey waxaa idin taaban lahaa waxaad qaadateen Darteed Cadaab wayn.

لَّوْلَا كِتَٰبٌ مِّنَ ٱللَّهِ سَبَقَ لَمَسَّكُمْ فِيمَآ أَخَذْتُمْ
عَذَابٌ عَظِيمٌ ٦٨

69. ee Cuna waxaad Qanimaysataan oo Xalaal Fiicana kana dhawrsada Eebe Illeen Ilaahay waa Dhaafe Naxariistee.

فَكُلُوا۟ مِمَّا غَنِمْتُمْ حَلَٰلًا طَيِّبًا ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ۚ
إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ٦٩

Ibnu Cabbaas waxaa laga wariyey in markay soo Degtay Aayadda Caddayn in Labaatan Muslimiina la Dagaallamaan Labo Boqol oo Gaala ah ay ku Cuslaatay Muslimiintii markaas Eebe soo Dejiyey Aayadahan ka Fududayn oo ah in Boqolku la Dagaalamaan Labo Boqol, Kunkuna Labo Kun la dagaalamo, Markay samraan oo adkaystaan Eebaa u gargaari, saasuuna Xaalku ku Sugnaaday, Sina uma banaana in markaas la cararo ama la Cabsado, markii Maalintii Badar Qaar la Laayey Gaaladii Qaarna la Qafaashay yuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) la Tashaday Asaxaabta sidii la yeeli lahaa Dadkaas markaasuu Sayid Abuubakar Yidhi aan Daynno oon la layn, Sayid Cumarna Yidhi ha la laayo, Markii la raacay soo Jeedintii Sayid Abuubakarna waxaa soo degtay Aayadahan oo Canaan ah, iyo inay habboontahay in Eebe la Adeeco Adduunna loo Xilan, saasna uu ku Xalaaleeyey Qaniimada laga helo Gaalada waxaana Muslimiinta ku Waajiba Jahaad, Adkaysi iyo Eebe Adeecid. Al-Anfaal (66-69).

---

70. Nabiyow ku Dheh kuwa la Qafaashay ee Gacmihiinna ku jira hadduu ku Ogyahay Eebe Quluubtiina Khayr wuxuu idin siin mid ka Khayrroon wixii laydinka Qaaday wuuna idiin Dhaafi, Eebana waa Dhaafe Naxariista.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِىُّ قُل لِّمَن فِىٓ أَيْدِيكُم مِّنَ ٱلْأَسْرَىٰٓ
إِن يَعْلَمِ ٱللَّهُ فِى قُلُوبِكُمْ خَيْرًا يُؤْتِكُمْ خَيْرًا مِّمَّآ
أُخِذَ مِنكُمْ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ۗ
وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ٧٠

71. Hadday Doonaan Khiyaamadaadana waxay Khayaameen Eebe mar hore markaasuu idin Makaniyey Eebana waa Oge Falsan.

وَإِن يُرِيدُوا۟ خِيَانَتَكَ فَقَدْ خَانُوا۟ ٱللَّهَ مِن قَبْلُ
فَأَمْكَنَ مِنْهُمْ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ٧١

72. Kuwa Rumeeyey ee Hijrooday ee ku Jahaaday Xoolahooda iyo Naftooda Jidka Eebe iyo kuwa Dumay (soo Dhaweeyey) una Gargaaray kuwaasu Qaarkood waa Gargaaraha Qaar, kuwa Rumeeyey oon hijroonin Gargaarkooda waxba idinkama Saarra intay ka Hijrooni, haddayse idiinku Gargaar warsadaan Diinta korkiinna Gargaarbaa ah qaar Dhexdiinna Ballan

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَهَاجَرُوا۟ وَجَٰهَدُوا۟ بِأَمْوَٰلِهِمْ
وَأَنفُسِهِمْ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ وَٱلَّذِينَ ءَاوَوا۟ وَّنَصَرُوٓا۟
أُو۟لَٰٓئِكَ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَآءُ بَعْضٍ ۚ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟
وَلَمْ يُهَاجِرُوا۟ مَا لَكُم مِّن وَلَٰيَتِهِم مِّن شَىْءٍ
حَتَّىٰ يُهَاجِرُوا۟ ۚ وَإِنِ ٱسْتَنصَرُوكُمْ فِى ٱلدِّينِ
فَعَلَيْكُمُ ٱلنَّصْرُ إِلَّا عَلَىٰ قَوْمٍ بَيْنَكُمْ وَبَيْنَهُم

yahay mooyee, Eebana waxaad Falay-
saan wuu Arkaa.

مِّيثَٰقٌۗ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٧٢﴾

Dagaalkii Badar ee waynaa waxaa lagu Qafaashay Gaalo Badan iyo Dad la soo Qasbay, Ciddii Toosnaata oo ka midana Eebe wuxuu Siin wax ka Khayroon wixii laga qaaday una Dambi Dhaafi, haddayse Nabiga Khayaamaan horay Eebe u Khayaameen markaas Muslimiinta Gacanta u galiyey, Illeen waa wax walba oge Falsane.
Tan kale Ciddii Rumaysay Xaqa oo Hijrootay oo Xoolaheeda iyo Nafteedaba ugu Jahaadday Jidka Eebe, iyo kuwii soo Dhaweeyey una Gargaaray Qaarkood qaarbuu Sokeeye u yahay, kuwaanse saas falin waxba kama dhaxeeyo intay ka falaan, haddayse Gargaar idin warsadaan waa loogu gargaari Ciddaan Ballan lala Dhigan. Al-Anfaal (70-72).

---

73. Kuwa Gaaloobay Qaarkood Waa Sokeeyaha Qaar haddaydaan saas falinna (Ogaanna) Fidmaa ahaan Dhulka iyo Fasaad wayn.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَآءُ بَعْضٍ ۚ إِلَّا تَفْعَلُوهُ
تَكُن فِتْنَةٌ فِى ٱلْأَرْضِ وَفَسَادٌ كَبِيرٌ ﴿٧٣﴾

74. Kuwa Rumeeyey ee Hijrooday ee ku Jahaaday Jidka Eebe iyo kuwa soo Dhaweeyey una Gargaaray kuwaasu iyagaa Mu‘miniina Dhaba ah, waxayna Mudan Dambi Dhaafid iyo Rizqi Sharafle.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَهَاجَرُوا۟ وَجَٰهَدُوا۟ فِى سَبِيلِ
ٱللَّهِ وَٱلَّذِينَ ءَاوَوا۟ وَّنَصَرُوٓا۟ أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ
ٱلْمُؤْمِنُونَ حَقًّا ۚ لَّهُم مَّغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٧٤﴾

75. Kuwa Rumeeya Gadaal oo Hijrooda oo Jahaada la Jirkiinna kuwaasu waa idinka mid, Qaraabadaana Qaarkeed Qaar ku Mudanyahay Xukunka Eebe Ilaahayna waxkasta waa ogyahay.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مِنۢ بَعْدُ وَهَاجَرُوا۟ وَجَٰهَدُوا۟ مَعَكُمْ
فَأُو۟لَٰٓئِكَ مِنكُمْ ۚ وَأُو۟لُوا۟ ٱلْأَرْحَامِ بَعْضُهُمْ أَوْلَىٰ بِبَعْضٍ
فِى كِتَٰبِ ٱللَّهِ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌۢ ﴿٧٥﴾

Waa in la Ogaado in Muslimiintuna Walaalo yihiin, Gaaladuna isu kaalmaystaan Colnimada Xaqa iyo Diinta Islaamka, Haddii kale waxaa dhici Fidmo iyo Fasaad wayn, Kuwa Xaqa Rumeeyase oo hijrooda kuna Jahaada Jidka Eebe iyo kuwa soo Dhaweeya una Gargaara kuwaasu waa Mu‘miniinta Xaqa ah ee Dhabta ah Dambi Dhaafid iyo Wanaagna way Mudan.
Kuwa Dib ka Rumeeya oo Hijrooda oo Jahaada la Jirkiinna waa idinka mid, Qaraabadaasi Qaarkeed Qaar ku mudanyahay Kitaabka Eebe, wax kastana Eebaa Og. Waxay Caddeeyeen Aayaduhu Abaalka Wanaagsan ee Mu‘miniintu Mudan Akhiro. Al-Anfaal (73-75).

## Suurat At-Tawbah سورة التوبة

1. Tani waa ka bari ahaasho Eebe iyo Rasuulkiisa kuwaad la Ballanteen oo Mushrikiinta (Gaalada) ah.

بَرَآءَةٌ مِّنَ ٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦٓ إِلَى ٱلَّذِينَ عَٰهَدتُّم
مِّنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿١﴾